

# Ka dhig gurigaa mid caafimaad leh oo bilaa lead ah

Guryaha la dhisay kahor 1978  
waxa kujiri kara ranji leh lead  
yo khataro kale.

Sanad kasta, boqolaal carruur ah  
Degmada Hennepin ayaa laga  
helaa in dhiiggooda uu ku badan  
yahay ilaa heer dhaawacaya  
caafimaadkooda.

Sumowga lead 100% waa  
laga hortagi karaa!

Degmada Hennepin waxay  
wax ka qabatay khatarta lead  
in ka badan 4,500 guri iyadoo u  
maraysa barnaamijka lead-ka.

## Khayraadka khatarta caafimaadka guriga ee kale

Deeqo iyo daymo ayaa sidoo kale la  
heli karaa si wax looga qabto khataraha  
caafimaad ee kale ee gurigaaga sida radon,  
qoyaanka, caaryada iyo cayayaaka.

Haddii aad tahay mulkiile-guri oo la nool  
ilme qaba xiiq, waxaad u qalmi kartaa  
qiimayn iyo maalgalin si aad u yarayso  
waxyaalahu xiiqda kiciya ee gurigaaga.

Nala soo xidhiidh si aad wax  
badan u ogaato:

612-543-4182  
[healthyhomes@hennepin.us](mailto:healthyhomes@hennepin.us)



Hennepin County  
Lead program

701 Fourth Avenue South  
Suite 400  
Minneapolis, MN 55415  
[healthyhomes@hennepin.us](mailto:healthyhomes@hennepin.us)  
612-543-4182


[www.hennepin.us/leadcontrol](http://www.hennepin.us/leadcontrol)

## Ka ilaali qoyskaaga koraya lead



Waxaad u qalmi kartaa  
qiimaynta lead-ka guriga oo  
bilaash ah iyo deeq gaadhaysa  
ilaa \$15,000





Daaqadaha duugga ah waa meelaha inta badan khataraha lead-ku ka yimaadaan guriga.

La kulmidda ranjiga lead-ku ku jiro waxay carruurta yaryar halis u galin kartaa:

- waxyeelo soo gaadha habdhiska maskaxda iyo dareenwadka
- gaabis ku yimaadda korriinka iyo koboca
- dhibaatooyin barasho iyo habdhaqan

Ma jiro heer lead-ku uu ammaan yahay!

## Ha sugin inaad ka dhigto gurigaaga mid bilaa lead ah!

Waxaad u qalmi kartaa qiimaynta lead-ka guriga oo bilaash ah iyo ilaa \$15,000 si lagaaga caawiyo in wax laga qabto khataraha lead ee gurigaaga, sida beddelista daaqadaha duugga ah.

### Shuruudaha mutaysiga:

- Gurigaaga ama guriga aad kiraysatay waxa la dhisay 1978
- Ilme ka yar lix jir ayaa ku nool ama si joogto ah u yimaadda gurigaaga ama guriga aad kiraysatay
- Qoysku wuxuu buuxiyey shuruudaha dakhliga

## Hadda bilaw!

[www.hennepin.us/leadcontrol](http://www.hennepin.us/leadcontrol)  
[healthyhomes@hennepin.us](mailto:healthyhomes@hennepin.us)  
612-543-4182

Xog raadi kusaabsan agabka ammaanka ilmaha ee bilaashka ah



## Sida la isku qoro iyo waxa la fisho:

Buuxi yogururin kooban ee kujirta [www.hennepin.us/leadcontrol](http://www.hennepin.us/leadcontrol) ama wac **612-543-4182**

Waanu kula soo xidhiidhi si aynu u muddayno booqasho guriga ah si loo go'aamiyo haddii gurigaagu uu ku habboon yahay barnaamijka deeqda.

Haddii lead la helo oo aad buuxisana shuruudaha mutaysiga, waxaanu kaala shaqayn hannaanka deeqda, xulashada qandaraaslaho iyo tallaabooyinka kale ee gurigaaga looga dhigayo mid ka madhan lead.

